


FAYRUSTA KORONADA MA LAGU KALA QAADAA XANNAANADA CARRUURTA?

Ku waalidiinta: Macluumaadkan la akhriso ilmaha si ilmuhu u fahmo macnaha daraasadda.


MACLUUMAAD KU SAABSAN DARAASADDA

- FAYRUSTU WAA ABUUR YARYAR OO AYNU KU BUKOON KARNO.
- FAYRUSTU WAA WAX AAD U YARYAR OO LA ARKI KARIN.
- MARARKA QAARKOOD CARRUURTU WAY KU BUKOOTAA FAYRUSTA.
- HAL FAYRUS OO NOOCAAS AH WAXA LA DHAHAA FAYRUSTA KORONADA,



WAXAANA INTA BADAN LOO SAWIRAA QAABKAN:

- FAYRUSTA KORONADU WAXAY KU FAAFTAY DUNIDA OO DHAN, XATAA NOORWAY. CARRUURTA AYAA IYANA QAADI KARA, LAAKIIN CAADI AHAAN AAD MA UGU BUKOODAAN.
- MA RABTAA INAAD NAGA CAAWISO IN AANNU OGAANO IN FAYRUSTA KORONADU KU FAAFAYSO XANNAANADA AAD AADO?
- HADDII AAD OGOSHAY KA QAYBGALKA, WAXA LA RABAA INAAD CANDHUUF KU TUFTO BEKEERI LAGU TUFO CANDHUUFTA AMA DADKA WAAWEYN EE KULA JOOGA GURIGA AYAA KAA CAAWIN KARA INAAD CANDHUUF KA SOO NUUGTO AFKAAGA ADOO ISTICMAALAYA TUUBO GAAR AH. ARRINTAN WAXA LA SAMAYNAYAA LABO JEER OO DHOWR MAALMO U DHEXEYAAAN
- WAXANNU EEGI DOONNA IN FAYRUSTA KORONADU KU JIRTO CANDHUUFTADA
- ISLA MARKAANA WAXANNU RABNAAN IN DADKA WAAWEYN EE GURIGU AY WARBIXIN KOOBAN NAGA SIIYAAN XAALADAADA (QANDHO MA QABTAA? MA QUFACAYSAA? MA BUKTAA?)
- MARKA CARRUURTA OO DHAN AY CAAFIMAAD QABTO, AYAAD DIB U BILAABI KARTAN INAAD KU WADA CIYAARTAN XANNAANADA 😊



Figur 1:
Marmar waxa xanuunsada dad jooga xannaanada

Figur 2:
Haddii adiga ama dad kale oo jooga xannaanada laga helo fayrusta koroonaada, waxannu rabnaa in aannu sii baadhno oo eegno in fayrus ku jirto candhuuftaada

Figur 3:
Markaa waa inaad laba goor candhuuf ku tuftid bekeeri/galaas, iyadoo loo dhaxaysiinayo maalmo Hooyo iyo aabo ayaa ku caawin kara

Figur 4:
Waalidkaaga waxa la siinayaa foom ay kaga waramayaan xaaladaada

Figur 5:
Marka ay dadkoo dhan caafimaad qabaan, ayaad markale ku wada ciyaari kartaan xannaanada